


Dhaqaalee biyaha, waxaad sidaas ku dhaqaalaynaysaa lacagta iyo bey'adda



Halkii qof wuxuu celcelis ahaan isticmaalaa 120 liitar oo biyo ah maalinti. Ku dhowaad kalabar biyahan waxay ku baxaan qubeys.



Biyaha diirran waxay labo jibbaar ka qaalisan yihiin biyaha qabow, sidaas darteed si gaar ah u dhaqaalee biyaha diirran. Sidaas ayaad ku yarayn kartaa biilka biyaha. Waxaa sidoo kale yaraynaysaa qashinka hawada ee ay sababto tamarta kullayska.



Sidaan ayaa biyaha loogu isticmaalaa guryaha

- Qubaysashada 45 %
- Jikada 17,5 %
- Dhar dhaqista 15 %
- Musqusha 15 %
- Waxyaabaha kale 7,5 %

Talooyinka isticmaalka waara ee biyaha



Qubaysashada

🔹 Biyaha badan ayaa qubayska ku baxa, sidaas darteed wakhti gaaban ku qubayso.
10 daqiiqo = 120 liitar oo biyo ah,
2 daqiiqo = 24 liitar oo biyo ah.

🔹 Xir biyaha qubayska marka aad saabuunta ama shaambada marsanayso.


🔹 Xir tubada biyaha, marka aad ilkaha cadayanayso ama aad garka xiiranayso.



Dhar dhaqista

🔹 Dhaq makiinnadda oo buuxda.

🔹 Dhaq dharka marka uu dharku si dhab ah wasakh u yahay – layri dharka wakhtiga u dhexeeya dhaqistooda.



Dhaqista weelka

🔹 Isticmaal makiinnadda weelka lagu dhaqo. Waxay isticmaashaa biyo kayar gacan ku dhaqista. Dhaq makiinnadda oo buuxda.

🔹 Haddii aad gacanta ku dhaqayso weelashada, micno darro ha u dareerin biyaha.

🔹 Ka dhig bullaacadda mid nadiif ah. Ha ku shubin bullaacadda cunto, saliid ama qashin.

